

Warqadda Warbixiinta  
Manitoba

# Macluumaadka Waalidiinta

F A S A L A D A 9 I L A A 1 2



Waxbarashada  
Manitoba (Manitoba  
Education) waxay soo  
saartey warqadda  
warbixinta ee heer  
gobol oo qasab  
ku ah dhamaan  
qeybaha iskuulada  
in ay bilaabaan  
inay isticmaalaan  
sanad dugsiyeedka  
2013/2014.

## Guud ahaan

### Maxay tahay sababta loo sameeyey warqadda warbixinta cusub (report card)?

Dowladda Manitoba waxay soo bandhigtey warqad warbixin ee cusub sii loo wanaajiyo tayada waxarashada ee gobolka Manitoba lana dhiso wadaqabsi adag oo u dhaxeeya ardayda, macalimiinta iyo waalidiintaba.

Waqtigii hore, warqadda warbixinta way kala duwaan jireen qeyb kasta oo iskuulka ka mid ah oo, xitaa mar marka qaarkood, iskuulo is qeyb ah ayaa sida ahaa. Warqadda warbixinta gobolka ee cusub waxay hubin doontaa in waalidiinta ay helaan macluumaad joogto ah, oo cad ee saabsan sida wanaagsan ee caruurtooda ay wax u barranayaan, waxa ay tahay tallaabada ka caawin doona in ay waxbarashadooda wanaajiyaan iyo waxa ay ka qaban karaan sidii ay u caawin la'haayeen.

### Ma noqon doontaa warqadda warbixinta mid sahlan oo la fahmi kara?

Warqadda warbixinta waxaa laga soo qorey luqad sahlan. Waxay kuu sheegi doontaa waxyaabaha ku saabsan kartida canugaaga iyo halka canugaaga kaalmo uga baahan yahay. Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan warqadda warbixinta, canugaaga macalinka ayaad kala hadli kartaa.

### Ma tahay warqadda warbixinta mid isku wada mid ah dhamaan heerarka fasalada oo dhan?

Waxaa jira seddex noocyo oo warqadda warbixinta ah: mid waa Fasalada 1 ilaa 6, midna waa Fasalada 7 iyo 8 iyo midna waa Fasalada 9 ilaa 12.

### Warqadda warbixinta ma lagu soo qori doonaa faallooyinka macalinta?

Haa. Macalimiinta waxay soo qori doonaan faallooyinkooda ku saabsan isluubta iyo howsha canugaada. Faallooyinka waxay kaa gargaari doonaan in aad fahamto sida canugaada uu yahay iyo sida loo caawin la'haa waxbarashada canugaada.

### Sidee ayaa loo qiimeeyaa wiilkeyga?

Fasalada horrumarinta akadeemiyadda (academic achievement) waxay muujisaa sida ugu wanaagsan ardayda uga guul gaaro manhajka ahdafta waxbarasho. Tani ayaa waxaa loogu yeeraa buundada cabirka lagu tilmaansado. Fasalada horrumarinta akadeemiyadda ma ahan kuwa ku saleysan sida canugaaga wax u qabto ee loo barbardhigo ardayda kale. Waxyaabaha dhaliya sida asluub, dadaal iyo dabeecad si gooni aha ayaa looga warbixiyaa horrumarinta akadeemiyadda. Inkastoo la isla fahamsan yahay in waxyaabahan dhaliya ay saameyn ku yeelato horrumarinta akadeemiyadda oo sidaas darteed buundooyinka, iyada oo si gooni ah loo warbixiyo waxay waalidiintu u fidsaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kartida canugooda iyo meelaha ardayda wanaajin uga baahan yahay.

Macalimiintu waxay ardayda u fidiyaan siyaab dhowr ah oo ay xirfaddahooda ku tusayaan iyo fahamkoda la xiriira maadada. Guud ahaan horrumarka buundooyinka waxay tilmaantaan canugaaga horrumarkiisa akadeemiyadda joogtada ah iyo kan ugu dambeeyey. Tusaale ahaan, tani waxay micnaheedu tahay in boondo hooseysa ee uu ku keenay imtixaan hore tiirarka kaasi lama fiirinayo goorta la doonayo in la ogaado buundada canugaaga ee dhamaadka teerarka haddii isaga ama iyada imtixaankaas ka dib ay buundadooda muujineysey mid ka sii wanaagsanaaneysa oo fahamkooda ama xirfaddahooda ay sii wanaagsanaanayaan.

### Sidee boondooyinka loo soo gudbin doonaa?

Boondooyinka ardayga waxaa lagu soo gudbin doonaa iyada oo boqolleey (boqolkiiba) la isticmaali doon.

### Miyuu canugeyga ku dhici karaa maado?

Haa. Fasalada 9 ilaa iyo 12 (dugsiga sare), kareedit ayaa lagu siiyaa taasoo lagu saleeyo caddeymaha guusha ka soo baxa waxbarashada ay manhajka gobolka ay meel dhigto. Buundada kama dambeyska ah ee ka yar 50% waxay muujineysaa in ardayga uusan muujin aqoon iyo xirfad ku filan ee maadada lagu barmoosi karo.

### Goormee ayaa warqadda warbixinta guriga loo soo dirayaa?

Iskuulada semistarka ah, warqadda warbixinta semistarkiiba laba jeer ayaa la soo dirayaa. Iskuulada aannan semistarka ahayn, waxaa la soo diraa xilliga dayrta, xilliga gu'a iyo dhammaadka sanad dugsiyeedka.

### Waaqiyadaha kale maclimiinta ma ka heli doonaa macluumaad?

Haa. Warqadda warbixinta waa hal siyaabo oo kaliya oo waalidiinta lagula xiriiro. Siyaabaha kale waxaa ka mid ah in la isku diro telfoon, emailka, warqadda warbixinta oo aan rasmi ahayn, kulamada macalimiinta iyo waalidiinta, kulamada ardaygu qabto iyo jaraa'idka iskuulka.

### Maxaan sameyn karaa haddii aan ka welwelayo canugeyga waxqabakiisa iskuulka?

Kala hadal canugaaga macalinka/eeda. Way kaa caawin doontaa haddii aad horey u qorato meelaha canugaaga dhibka ka haysto. Maclinka weydii sida aad u wada shaqeyn kartaan si canugaaga looga caawiyo inuu guuleysto.



Dokumentigan  
dhexdiisa, kalmada  
waalidiinta ee  
dokumentigan aynu  
ku isticmaalney  
waxaan ula jeednaa  
waalidiinta ama  
mas'uuliyiinta.

# Barnaamijka Ardayga

# Macluumaadka Waalidiinta

FASALADA 9 ILAA 12

Barnaamijka ardaygaaga waxaa loola jeedaa in haddii iyada ama isaga uu la socdo manhajka heerka fasal, ama barnaamijyo kale ee loogu talagalay gaar ahaan sida si wanaagsan loo wajaho baahidiisa/eeda waxbarasho.

Kuwa ku jira Fasalada 9 ilaa 12 (dugsiga sare), koorsooyinka waxay isticmaalaan nidaam lambar ee seddex xaraf ah. Xarafka seddexaad (tusaale ahaa, 20F – “F”, ee tusaalahan) wuxuu sheegayaa in nooc ka mid ah barnaamijka canugaaga uu raacayo ama ku jiro. Haddii canugaaga uu ku jiro ama raaco manhajka heer-fasal ee maado, warqaddiisa warbixinta waxay isticmaali dontaa mid ka mid ah xarfahan:

F (Foundation (Aassaas)), S (Specialized (Taqaasus)) ama G (General (Guud)).

Haddii canugaaga uusan ku jira ama raacayn manhaj heerka-fasal ee maado, warqadda warbixinta waxaa ku qornaan doonaa mid ka mid ah seddexda nooc barnaamij ee soo socda (iyo sumadda xarafadda la xiriiira) ee ay quseyso.

## 1. Barnaamijka M

“M” waxay loola jeedaa barnaamijka wax ka badalidda ee loo baahnaa maxaa yeeley itaal-la'aanta garashada maskax. Buundooyinka uu helo ardaygaan waxay ku qorannaan doonaa warqadda warbixinta waxayna muujinaysaa ahdaafta barasho ee ku haboon ardaygaasi, iyo ahdaaftan waxaana si cad loogu qeexay qorshahaas ardayga ee (IEP).

## 2. Barnaamijka E

“E” waxaa loola jeedaa sida barnaamij Ingiriis Luqad Dheeraad ah (EAL). Ardayga ku jira heerka koowaad ee barashada Ingiriiska sida luqad dheeraad ah waxay ahmiyadda saarayaan barashada Ingiriiska ee maadooyinkaas. Fasalada ardaygaas uu helayo waxay ku qoran tahay warqadda warbixinta kaasoo ku saleysan miisaaniyadda luqadda iyo hadafyada waxbarsaho ee maadooyinka ku haboon heerka luqad ee ardaygaas. Hadafyadan waxaa si cad loogu qeexay qorshaha waxbarasho ee EAL ardayga.

## 3. Barnaamijka L

“L” waxay loola jeedada barnaamijka aqriska oo waxay quseysaa barnaamijka Dhexgalka Faransiiska ee fasalka 9 ilaa iyo 12. Ardaga u baahan taageero dheeraad ah si loo kobciyo xirfadda luqadda Faransiiska in ay si guul ah u raacaan manhajka gobolka ayaa waxay ahmiyadda ay saari karaan barashada French ee macnaha guud ee qeybta maadadaas. Fasalada ardaygaas uu helayo waxay ku qoran tahay warqadda warbixinta kaasoo ku saleysan miisaaniyadda luqadda iyo hadafyada waxbarsaho ee maadooyinka ku haboon heerka luqad ee ardaygaas. Hadafyadan waxaa si cad loogu qeexay qorshaha waxbarasho ee wax aqriska iyo qorista Faransiiska ee ardayga.

Tusaalaha ku qoran warqadda warbixinta hoose, waxad ka arki kartaa halka barnaamijka oo goobaabin cas lagu qorey. Marka ay sidan tahay, ardayda ku jira ama raacaya barnaamij wax ka badalid (“M”) ee maadada xisaabaadka.



	Attendance and Achievement							Learning Behaviours							
	Term 1			Term 2			Final			Term 1			Term 2		
	Lates	Absences	Grade	Lates (Total)	Absences (Total)	Grade	Final exam	Final grade	Personal management skills	Active participation in learning	Social responsibility	Personal management skills	Active participation in learning	Social responsibility	
Semester:	Course: <b>Mathematics 10 M</b>														
Teacher:			%			%	%	%							
Credit Value:	Comments: <input type="checkbox"/> IEP (behaviours)														
Credits Earned:															

## Horrumarinta Akadeemiyadda ee gobolka u filayo

Miisaanka buundada boqolleey (boqolkiiba) waxaa loo isticmaalaa warqadda warbixinta ardayga si loo muujiyo gebi ahaan fasalka ardayga maadato kasta uu qaato. Jaantuska hoose wuxuu muujinayaa sida miisaanka buundada boqolleeyda ay la xiriirto horrumarinta akadeemiyadda maadadaas, iyo sidoo kale sumaddaha kale ee la isticmaalo. Ogsoonow in Fasalada 11 iyo 12 ee maadooyinka Waxbarashada Ciyaaraha/Waxbarashada Caafimadka, lama isticmaali doono miisaanka buundada ee boqolleeyda. Beddelkeeda, sumaddaha **CO** iyo **IN**, oo hoos ku qeexan, ayaa loo isticmaali doonaa warqadda warbixinta.

Academic Achievement of Provincial Expectations	Percentage Grade
Very good to excellent understanding and application of concepts and skills	80% to 100%
Good understanding and application of concepts and skills	70% to 79%
Basic understanding and application of concepts and skills	60% to 69%
Limited understanding and application of concepts and skills; see teacher comments	50% to 59%
Does not yet demonstrate the required understanding and application of concepts and skills; students with a final grade of less than 50% are not granted course credit; see teacher comments	Less than 50%

### Additional Codes

<b>Course Complete:</b> Final passing grade for courses using CO/IN for grades, e.g., Grades 11 and 12 Physical Education/Health Education.	<b>CO</b>
<b>Course Incomplete:</b> Final grade showing insufficient evidence of learning for courses using CO/IN for grades, e.g., Grades 11 and 12 Physical Education/Health Education. May also be used in other courses but not as a final grade.	<b>IN</b>
No exam applies	<b>NE</b>
No mark for the school-based final exam or provincial test, where applicable	<b>NM</b>

Tusaalooyinka soo socda waxay muujineysaa ardayga qaata maadada Sayniska ee Fasalka 10 ee barnaamijka manhajka heerka-fasalka. Sidoo kale waxay muujinaysaa dabeecaddaha waxbarasho ee seddexda, kuwaasoo si faahfaahsan hoos loogu qeexay. Waxaa ka mid ah imtixaanka kama dambays ah oo 20% buundada kama dambayska ah.

	Attendance and Achievement						Learning Behaviours								
	Term 1			Term 2			Final			Term 1			Term 2		
	Lates	Absences	Grade	Lates (Total)	Absences (Total)	Grade	Final exam	Final grade	Personal management skills	Active participation in learning	Social responsibility	Personal management skills	Active participation in learning	Social responsibility	
Semester: 1 Teacher: Ms Osmand Credit Value: 1 Credits Earned: 1	Course: <b>Science 20F</b>														
	2	1	70%	3	1	75%	80%	76%	C	U	S	U	S	C	
	Comments:									<input type="checkbox"/> IEP (behaviours)					

## Ka qalinjebinta dugsiga sare

Fasalka 9 ilaa 12 (dugsiga sare), ardayda ku wajahan qalinjebintooda ee maado kasta ee ay qaataan ku kasbadaan, heer fasalka kasta, goorta buundo baasitaan ah 50% (ama ka badan) ay keenaan.

Macluumaad loogu talogaley waalidiinta oo ku saabsan shuruudha qallanjebinta waxaa laga heli karaa qatka internetka oo ah:

[www.edu.gov.mb.ca/k12/policy/grad\\_require.html](http://www.edu.gov.mb.ca/k12/policy/grad_require.html)

Waxaa adiga iyo canugaagaba muhiim u ah in aad hubisaan buundada uu canugaaga kasbanayo buundada u horseeda qallanjebinta, oo ku haboon canugaaga qorshihiisa qallanjebinta ka dib. Warqadda warbixinta waxaa ku qoran shaxan muujinaya horumarka ardayda ee ku aaddan qallanjebintiisa. Haddii aad abad qabto welwel ku saabsan kan, canugaaga iskuulkiisa la xiriir.

## Dabeecaddaha barashada

Horrumarinta akadeemiyadda ee la soo gudbiyo waxaa raacsan, warqadda warbixinta ee muujisa dadaalka iyo asluubta canugaaga ee fasalka dhexdiisa, kaasoo lagu soo qoro hoosta “Dabeecaddaha Barashada,” sida ka muuqata oo lagu sharaxay tusaalooyinka bogga hore iyo kan hoose. Sanduuqa IEP ee qeybtan waxaa loo isticmaali doonaa haddii canugaaga leeyahay qorshaha waxbarashada shaqsiyaadka oo weheliya himilooyinka la xiriira dabeecaddaha barashada.

Learning Behaviours	
<b>Scale</b>	<p><b>C:</b> Consistently – almost all or all of the time      <b>U:</b> Usually – more than half of the time</p> <p><b>S:</b> Sometimes – less than half of the time      <b>R:</b> Rarely – almost never or never</p>
<b>Personal management skills</b>	Uses class time effectively; works independently; completes homework and assignments on time
<b>Active participation in learning</b>	Participates in class activities; self assesses; sets learning goals
<b>Social responsibility</b>	Works well with others; resolves conflicts appropriately; respects self, others and the environment; contributes in a positive way to communities

Dabeecaddaha barashada si toos ah looma soo raaciyo fasalka ardayga, balse waxay saameyn ku yeelan kartaa horrumarkooda akadeemiyadd. Horrumarka dabeecad waxbarasho oo wanaagsan waxay ardayga u dhalin kartaa mustaqbal guul leh inta ay ku sii jiraan noloshooda iyo iskuulka dibaddiisa. Haddii ardayga uu si madax-banaan u shaqeey, hal-abuurna yeesho oo uu texgeliyo fasalka qiimeeyo, xirfaddahan waxaa uu la tagi karaa qeybo kale oo ka mid ah noloshooda.

Ardayda ku jirta barnaamijka Dhexgalka luqadda Faransiiska, waxaa sidoo kale jira dabeecado waxbarasho oo ku saabsan kaalin ka qaadashada ardayga ee isticmaalka luqadda Faransiiska.



## Macluumaad dheeraad

Booqo bogga Waxbarashada Manitoba macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan

- waxa uu ubadkaaga ka barto **maadooyinka kala duwan:**  
[www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/](http://www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/) (Barnaamijka Ingiriiska)  
[www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/fr\\_imm/](http://www.edu.gov.mb.ca/k12/cur/parents/fr_imm/) (Barnaamijka French Immersion Program)  
[www.edu.gov.mb.ca/m12/progetu/parents/](http://www.edu.gov.mb.ca/m12/progetu/parents/) (Barnaamijka *Français* Program)
- sharciyda iyo xeerarka **qiimeynta ardayga:**  
[www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/](http://www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/)
- **warqaddeeda warbixiinta:**  
[www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report\\_cards/index.html](http://www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report_cards/index.html)

## Faaladada waan soo dhoweyneynaa

Haddii aad tahay waalid ama mas'uul, barre, ardayga ama xubin jaaliyadda ka mid ah oo daneeya iyo kaleba, jawaab-celintaada la xiriira warqadda warbixinta cusub waa inoo muhiim. Gebi ahaan, miyaad u aragtaa warqadda warbixinta in ay tahay mid cad oo la fahmi kara oo macluumaad sida? Ma jirtaa qeybo ka mid ah warqadda warbixinta oo aad weli isleedahay waxbaa laga bedelli karaa oo waala hagaajin karaa?

Haddii aad dooneysid in aad talo ka bixiso, fadlan email-ahaan kula xiriir cinwaanka hoose ama booqo bogga internetka ee ku qoran oo buuxi foomka jawaabcelinta soona gudbi.

Jawaabcelinta boosto ku so dir	Jawaabcelinta online-ahaan ku soo dir
<i>Provincial Report Card Feedback</i> Manitoba Education 1567 Dublin Avenue Winnipeg MB R3E 3J5	<a href="http://www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report_cards/feedback.html">www.edu.gov.mb.ca/k12/assess/report_cards/feedback.html</a>

